



Barwaaqo

Isku-duwaha (Coordinator) iyo Adeegyada Isku-dhafan

Waa maxay Sharciga Barwaaqada?

Sanadkii 2021, waxaa Act on Integrated Services for the Benefit of Children's Well-Being No. 86/2021 laga ansixiyay Iceland. Ujeeddada sharcigan waa in la hubiyo in dhammaan carruurta ku nool Iceland ay helaan adeegyo isku-dhafan.

Maxay yihiin adeegyada isku-dhafan?

Adeegyada isku-dhafan waxay ka dhigan yihiin in dhammaan kuwa bixiya adeegyada ilmaha iyo qoyskiisa (tusaale ahaan: xannaanooyinka, dugsiyada waajibka ah, dugsiyada sare, xarumaha caafimaadka aasaasiga ah, iyo adeegyada bulshada) ay si wadajir ah ula qiimeeyaan waalidiinta iyo/ama ilmaha waxa dhibaataadu tahay, adeegyada loo baahan yahay si loo xalliyo dhibaataadaas, iyo sida loo taageeri karo tallaabooyinka xiga.

Yaa codsan kara adeegyada isku-dhafan?

Dhammaan waalidiinta iyo carruurta ku nool Iceland waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan adeegyada isku-dhafan. Waxa kale oo suurtagal ah in la codsado adeegyadan inta lagu jiro uurka.

Sidee loo codsadaa adeegyada isku-dhafan?

Waalidiinta iyo/ama carruurta waxay la hadli karaan isku-duwaha barwaaqada ee ku sugan xannaanada, dugsiga waajibka ah, dugsiga sare, xarunta caafimaadka, ama adeegyada bulshada haddii ilmuhu uusan dugsi dhigan.

Isku-duwaha ayaa siinaya hagid wuxuuna la qiimeeyaa haddii adeegyada isku-dhafan ay caawin karaan. Codsiga adeegyada isku-dhafan waxaa lagu sameeyaa iyadoo la saxiixo foom qoran, ha ahaado warqad ama si elektaroonik ah.

Ma diidi karaan ama ka bixi karaan adeegyada isku-dhafan waalidiinta iyo carruurta?

Adeegyada isku-dhafan mar walba waa ikhtiyaari, waalidiintuna way aqbali karaan ama diidi karaan— marka laga reebo xaalado gaar ah oo ay Child Protection Act No. 80/2002 u aragto inay lagama maarmaan u tahay ilmaha. Waalidiinta iyo ilmaha labaduba waxay ka laaban karaan codsigooda wakhti kasta.

Maxay u oggolaanayaan adeegyada isku-dhafan bixiyayaasha adeegga?

Marka adeegyada isku-dhafan la hirgeliyo, kuwa bixiya adeegyada ilmaha waxay is-weydaarsan karaan xog muhiim ah isla markaana si wadajir ah uga shaqayn karaan xallinta dhibaatooyinka ilmaha, iyagoo haysta oggolaanshaha waalidka ama ilmaha (marka ay ku habboon tahay).

Waalidiintu markaas uma baahna inay la hadlaan dhinacyo badan oo kala duwan si gooni-gooni ah; xogta muhiimka ah oo keliya ayaa lala wadaagaa xirfadlayaasha ku habboon.

Waalidiintu ma siinayaan oggolaansho in qof walba uu ka hadlo dhammaan dhinacyada nololsha ilmaha.

Xaggee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

FMacluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa Ingiriisi, Polish, iyo Icelandic boggan:

www.farsaeldbarna.is

*Sharciga Barwaaqada Lr. 86/2021

*Sharciga Ilaalinta Carruurta Lr. 80/2002